Allahayow Qofkii Madax u noqda Ummaddayda oo wax ku adkeeya isna ku adkee, midka Madax u noqda Ummaddayda oo u naxariistana u naxariiso

Caa'isha Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inay tiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo ku dhahaya Gurigaygan dhexdiisa: "Allahayow Qofkii Madax u noqda Ummaddayda oo wax ku adkeeya isna ku adkee, midka Madax u noqda Ummaddayda oo u naxariistana u naxariiso."
[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu habaaray Qofkastoo Madax ka noqda arimaha Muslimiinta hayaraado arinkaasi ama ha weynaadee, Madaxtinimadaasi ha noqoto mid guud ama mid kooban ee gaara, Qofkaasoo Madaxtinimadiisa dadka ku dhibaateeya, oo aan u naxariisan, Ilaahay wuxuu ku abaal marin camalkii uu sameeyey noociisa, wuuna ku adkayn. Midkase u naxariista dadka oo u fududeeya arimahooda, Ilaahay ayaa u naxariista oo u fududeeya arinkiisa.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/5330